



Isagu maalina muu oran: Rabiyyow iga dhaaf dambigayga maalinta qiyaame

Caa'isha raali Allaha ka noqdee waxaa laga wariyey inay tiri: Wuxuu yiri: ma anfacayo, isagu maalina muu oran: Rabiyyow iga dhaaf dambigayga maalinta qiyaame.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Cabdillaahi Binu Judcaan, oo ahaa Islaamka ka hor madaxdii qurayshta Ficiladiisii wanaagsanaa waxaa ka mid ahaa: xiriirintii qaraabadiisa, quudinta masaakiinta iyo wax yaabo kale oo islaamku ku booriyey dadka, wanaagaa uu qaban jiray ninkaa Aakhiradiisa waxba u tarimayso, sababtuna waa inuu Ilaahay ku kufriyey, oo uusan maalina oran Rabiyyow ii dhaaf gafkayga maalinta qiyaamaha.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65009>

النّجّاة الخيريّة
ALNAJAT CHARITY



لجنة الدعوة الإلكترونية
E-Dawah Committee

